

Kaalmada HomeHelpMN ee Xaalada Degdega ah ee COVID-19 Habka Racfaanka Minnesota Housing

Haddii lagu diido kaalmada ama haddii codsigaagii laga noqday sababtoo ah ma dhamaystirnayn, waxaad racfaan ka qaadan kartaa go'aankaas.

Haddii codsigaagii la diiday ama laga noqday, waxaad heshay warqad diidmo ah oo qoran (ama email ama USPS laguugu soo diray) oo ay ku qoran tahay sababihii codsiga looga noqday ama loo diiday. Haddii aad aaminsantahay in go'aanka si qalad ah lagu gaaray, waxaad ka qaadan kartaa racfaan go'aankaas. Codsiga racfaanka waa in lagu dalbado qoraal ahaan 14 maalmood gudahooda laga bilaabo taariikhda warqada diidmada.

Arjiyada Laga Noqday: *Fadlan ogow in aad dib u soo codsan karto caawimo iyada oo aan loo eegin haddii aad doorato in aad rafcaan ka qaadato go'aanka iyo in kale, iyada oo ku xiran in la hayo maalgelin/lacag iyo inta barnaamijku aqbalayo arjiyada.*

Haddii aad rabto inaad racfaan ka qaadato:

- Waxaad ku soo gudbin kartaa codsigaaga racfaanka mid ka mid ah siyaabaha soo socda:
 1. Gudaha nidaamka arjiga: Gal akoonka arjigaaga, dooro "appeal" ("rafcaan"), oo geli macluumaadka la codsaday.
 2. Boostada Mareykanka:
HomeHelpMN
P.O. Box 2408
Minneapolis, MN 55402
 3. Fakis ahaan: Ku soo dir 612-435-4863

Waxa ay tahay in aad ku soo darto racfaankaaga:

- Marka aad soo gudbinayso codsiga racfaanka, waa inaad ku soo dartaa:
 1. Aqoonsiga kiiska
 2. Magaca
 3. Cinwaanka
 4. Macluumaadka xiriirka
 5. Maxaad u aaminsantahay in go'aanka lagu gaaray si qalad ah
(sii socota bogga 2)

6. Dukumeenti lagu taageerayo codsiga racfaanka
 - a. Haddii lagu diiday gargaarka iyada oo lagu salaynayo u qalmi waayid, waa inaad keentaa dukumeenti la xiriira caddaynta u qalmitaanka si aad u taageerto codsiga racfaanka.
 - b. Haddii aad aaminsan tahay in go'aanka ka noqoshada arjigaagu uu ahaa mid qalad ah, waa inaad si cad u muujiso inaad ka soo jawaabtay codsiyada macluumaadka adigoo isticmaalaya habab la caddayn karo taariikhda iyo wakhtiga la soo diray.

Xasuusin: Soo gudbinta macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan xaaladahaagu ma dammaanad qaadayso in arjigaaga loo go'aamin doono inuu xaq u leeyahay gargaar.

Dib u eegista rafcaan:

- Haddii, dib u eegista kadib, lagu arko inaad u qalanto caawimo, arjigaaga waxa la qiimayn doonaa iyadoo lagu salaynayo wakhtiga iyo taariikhda arjigii asalka ahaa la soo gudbiyay iyo lacagta la heli karo.

XASUUSIN: Go'aanka rafcaanka ee aad ku guuleystaa kuuma dammaanad qaadayo in lacagta lagaa bixiyo.

Minnesota Housing ama adeeg bixiyeyaasheedu waxa ay dib u eegi karaan oo kaliya rafcaannada codsiyada barnaamijka HomeHelpMN.
- Haddii diidmada kaalmada lagu adkaysto, waxaa lagu soo diri doona warqad qoran oo ah go'aanka kama dambaysta ah iyada oo loo marayo nidaamka isgaarsiinta, emailka ama USPS oo ah go'aanka iyo sababaha loo taageeray diidmada.